

Badbaadada Dabka

Dab ka ilaalinta gurigaaga

Qalabyada digniinta qiiqa

Xaqiiji inaad gurigaaga ku haysato qalabyada sheega qiiqa oo shaqaynaya oo tijaabi toddobaad walba.

Haddii aad u malaynayso in mid ka mid ah qiiq-sheegahaagu/qalabyada qiiqa aanu shaqaynayn ama haddii ay qaylinayaan, isla markiiba noo soo sheeg. Weligaa ha daboolin ama meeshooda haka saarin qalabka qiiqa sheega.

Ma ogeyd?

Inaad haysato qalabka qiiq sheegaha oo si fiican u shaqaynaysa waxay afar jibaar ka dhigaysaa in aad ka badbaado dab kacay habeenkii.



Noqo mid koronto ahaan u feejigan

- Mar walba ha bedelin fiyuusyada la afuufay: hubi qalabyada.
- Xaqiiji in dhammaan qalabyada korontada ay leeyihiin calaamada badbaadada Ingiriiska ama Yurub marka aad soo iibsanaaso.
- Isla markiiba nooga soo warbixi calaamadaha gubashada, midab bedelmidda ama si xun u gelinta duleelada korontada.
- Duleelka korontada ha ku isticmaalin qalabyo tiro badan - isku day in aad hal waayar ku isticmaasho god kasta.
- Haddii aad u baahan tahay inaad wax ka bedesho fiilooyinka korontada, waxaad marka hore u baahan doontaa ogolaanshahayaga. Wixii shaqo kasta ah waa in uu qabto koronto yaqaan aqoon u leh.
- Korontada ka saar bustadaada korontada kahor intaadan sariirta gelin, marka laga reebo haddii bustada ay leedahay kontoroolka kulaylka ee si badbaado leh loogu isticmaali karo habeenkii oo dhan.
- Kuleyliyayaasha la qaadi karo si fiican ugu xir derbiyada si aad uga hortagto inay soo dhacaan.



Ma ogeyd?

Qalabyada korontada ku shaqeeya oo ciladeysan, fiilooyinka iyo gododka korontada oo si xad dhaafka ah loo isticmaalo waxay sababaan ilaa 7,000 oo dab guri ka kaco ah sanad walba gudaha UK.



Si taxadar leh u isticmaal shumacyada

Shumacyada iyo nalalka shaaha dhig meelhayaal habboon oo ka fog daahyada iyo dharka.

WALIGAA HA UGA TAGIN ILAALO LA'AAN.

Sigaarka:

- Sigaarka si fiican u dami oo si taxadar leh u tuur.
- Haddii aad sigaar ku cabto gurigaaga dhexdiisa, weelka sigaarka lagu demiyo ha saarin fadhiga ama kursi. Isticmaal sigaar-demiye haboon oo qoto dheer, culus oo aan guban karin.
- Ka taxaddar haddii aad sigaar cabayso adigoo daalan, markaad qaadanayso daawooyinka lagu soo qoray, ama haddii aad khamri cabtay. Weligaa sigaar ha ku cabin sariirta dusheeda.
- Taraqa iyo dab- shidaha dhig meel aanay carruurto gaari karin. Tixgeli inaad soo iibsatiid laytarada aanu iyo sanduuqyada kabriidka ee aanu ilmaha isticmaali karin.

Jaajar garaynta beteriyaadaha

- Si weyn uga taxaddar markaad jaajar garaynayso baaskiillada elektaroonigga ah, mootooyinka elektaroonigga ah, mootooyinka dhaqdhaqaaqa iyo taleefannada gacanta kuwaas oo isticmaala baytariyada lithiyamka ah. Baytariyadan ayaa la sheegay inay ka dhalan karaan dab halis ah.
- Ka fogow inaad beteriyaadan jaajar garayso habeenkii, oo isticmaal qol ka fog wadada aad ku baxsato markuu dab kaco, qolkaas oo leh qalabka qiiqa oo shaqaynaya. Wixii talo dheeraad ah ka raadi 'Curo lithium batteries' ama na weydiiso caawimaad.

Xilliga dabka, isdeji oo si dhaqso ah falcelin u sameey. Xir albaabka oo xaqiiji in qof walba uu si badbaado leh uga baxo guriga. Wac 999 oo u sheeg cinwaanka saxda ah.

Haddii aad rabto in aad hesho macluumaadkan oo qaab kale ah fadlan nala soo xiriir.



Sameyso qorshe aad ku baxsato

Haddii uu dab ka kaco gurigaaga qof kastaa ma ogyahay sida si badbaado leh looga baxo guriga? Fiiri fursadahaaga oo sameyso qorshe si qof kasta oo gurigaaga jooga uu u ogaado sida looga baxsado dab kacay.

- Dariiqa ugu fiican inta badan waa dariiqa caadiga ah ee laga soo galo loogana baxo guriga. Haddii iridaada caadiga ah uu dabku xannibay, sideed uga bixi kartaa guriga? Ka fikir waddo/irid ka bixitaan oo labaad oo macquul ah inuu isticmaalo qof kasta oo gurigaaga jooga.
- Meelaha/iridaha laga baxo ee gurigaaga ka dhig kuwo aan xannibaad lahayn si ay dadku ugu baxsadaan dabka.
- Xaqiiji in furayaasha daaqadaha iyo albaabada ay fududahay in la helo.
- Haddii aad ku nooshahay guri dabaq ah, baro habraaca daadgureynta. Habraacaas waxaa lagu sharxi doonaa 'ogaysiis ka falcelinta dabka' oo lagu soo bandhigo gudaha albaabka weyn ee qeybtaada guriga. Weligaa ha isticmaalin wiishka haddii dhismahaagu gubanayo.

Feejignaaw - xaqiiji in waddada/iridaha aad ku baxsanayso aanay ku xanibnayn alaab taala jaranjarada ama dariiqyada.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo qorsheynta iridda/wadada baxsada ama aad u malaynayso inaad dhibaato kala kulmi karto daadguraynta fadlan nagala soo xiriir **01225 366000**.



Sameyso habdhaqanka wakhtiga hurdada

Caadeyso in aad albaabada xirto habeenkii. Haddii aad rabto in aad albaabka qolka jifka ee ilmaha ka dhigto mid furan, xir albaabada qolka fadhiga iyo jikada. Haddii uu dab kaco habeenkii, arrintaas waxay joojinaysaa inuu si degdeg ah ugu faafo guriga.

Ha kaga tagin TV-ga ama qalabyada kale ee korantada ku shaqeeya iyagoo ku xiriisan korantada, xilliga Kirismaskana dami nalka geedka kirismaska marka la gaaro habeenkii.

Ka fikir/taxadir alaabtaada guriga

Xaqiiji in alaabta gurigaagu ay buuxisay Heerarka Britishka  iyo inay leeyihiin calaamadda alaabta guriga. Calaamadaas waxay ka dhigan tahay inay alaabta ku jiraan waxyaabaha gudaha laga geliyo ee dabka ka difaaca iyo in alaabta aysan sii deyn doonin qiiq sun ah xilliga dabka.

Xaqiiji in alaabta guriga ay ka fog yihiin ilaha kulaylka sida dabka, kuleyliyaasha iyo shumacyada.

Badbaadada jikada

- ka digtoonow markaad wax ku karinayso saliid kulul. Ka fikir soo iibsashada qalabka shiilitaanka dufanta oo ku xiran heerkulbeeg (thermostat).
- Dabab badan oo jikada ka kaca ayaa bilaabma inta aan wax karinta la ilaalinayn. Haddii aad wax karinayso adigoo isticmaalaya islada ama birta wax dubista, waligaa ha ka tagin jikada oo waligaa ilmaha geligood ha uga dhex tagin jikada marka islada ama foornada ay shidan tahay. Dufanta, saliidda iyo cuntada kulul, si fudud ayay u kululaan karaan oo ay dab u kicin karaan.
- Haddii aad isticmaalayso foornada, isticmaal alaarmiga.
- Nadiifinta qalabyadaada korontada wax lagu kariyo iyo marawaxadda waxay yaraynayn khatarta dabka.
- Haddii aad jikada kula kulanto dab ha isku dayin inaad wax ka qabato. Dami kulaylka haddii aad si badbaado leh u awooddo, xir albaabka jikada, **oo iskaga bax guriga oo wac 999**.
- Weligaa gudaha gudaha haku isticmaalin shooladda kaamka ama BBQ.

Haddii aad qabto balkoono, fadlan:

- Balkoonaha ha geynin wax dab ah oo furan, birta hilibka lagu dubo ama olol kale.
- isku day inaad yarayso wax kasta oo dab qabsan kara. Dhir yar ayaa ku habboon guriga laakiin alaab badan ayaa u oggolaan kara in dabku faafo.
- Balkoonaha ha ku kaydin walxaha halista ah sida dhalooyinka gaasta ama dareerayaasha guban kara, oo ay ku jiraan mootooyinka.
- Fiilooyinka korontada ha marsiin balakoonkaada haddii ay cimiladu isbedesho ama fiilada ay waxyeelowdo.
- Haddii aad sigaar ku cabto balakoonka, ka digtoonow inaad si buuxda u damiso sigaarkaaga adigoo isticmaalaya weel badbaado leh oo si joogto ah u faaruqi.

Fadlan macluumaadkan muhiimka ah ku hay meel la gaari karo

Nala soo xiriir

Qabso, lacagta iska bixi, oo xaqiiji - wax walba diyaarso si deg deg ah MyCuro
www.curo-group.co.uk/mycuro

Wada sheekeysii toos ah, Facebook, Twitter, iimaylka iyo qaar kaloo badan
www.curo-group.co.uk/contact